



acmaashu waa niyada uun, qof kastana wuxuu niyeystay uun buu leeyahay

Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay scw ayaa yiri: "Camalku wuxuu ku ansaxayaa niyada, qof walbana wuxuu niyoodo ayuu leeyahay, qofka hijradiisu tahay Ilaahay iyo Rasuulki dartood, hijradiisu xaga Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayey ahaatay, qofkase hijradiisu ahayd inuu aduunyo helo ama haweeney uu guursado darteed, hijradiisu waa waxa uu u soo hijrooday uun ". Ruwaayada Bukhaarina waxay ahad: " acmaashu waa niyada uun, qof kastana wuxuu niyeystay uun buu leeyahay. "

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey in camalka dhamaanti niyada loo eegayo, xugunkaasina waa dhamaan camal walba sida cibaadada iyo mucaamalaadka oo dhan, qofka camalkiisa u niyeysta inuu nafac helo ma helaayo wax aan nafacaas ahayn mana helaayo ajar, qofkiise niyeysta inuu Ilaahay ugu dhawaado camalkiisa wuxuu ka helyaa sawaab iyo ajar hadii xataa uu yahay camal caadi ah sida cunida iyo cabida. Nabigu scw tusaaluu u soo qaatay si uu u cadeeyo saamaynta ay niyadu ku leedahay camalka, iyadoo acmaashu siman tahay muuqaalkooda guud, Nabigu wuxuu cadeeyey qofka u niyeysta hijradiisa ee dalkiisa uga safra Ilaahay raali galinti, hijradiisu waa mid sharci ah oo Ilaahay aqbalayo, kana ajar siinayo niyadiisoo runa awgeed, qofka hijradiisa u niyeysta inuu nafac aduun helo sida xoolo, jago, ganacsi iyo dumar uu guursado hijradiisa kama helaayo nafaca uu niyeystay mooyee mana helaayo ajar iyo sawaab.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4560>

